

SOMALI

BOKSTART

KU HADALKA AFKA OO LOO
BILAABO ISLA MARKIIBA



KU SOO DHAWOOW BOKSTART

BOKSTART waxa uu dadka waaweyn ku dhiirigelinayaa inay ilmahooda kor ugu akhriyaan, u heesaan, tix u mariyaan oo la hadlaan. Waxa muhiim ah in xilli hore la dhiirigeliyo ku hadalka afka si ilmuhu marka dambe u noqdo mid ku wacan akhrinta, jecel buugaagta isla markaana u barto ereyo badan. BOKSTART waxa uu ilmahaaga ka dhigayaa mid u diyaar ah mustaqbalka.

Maktabadda waxa yaala buugaag loogu talagalay da' kasta oo ku qoran afaf badan. Waa bilaash in la amahsado.



Maya,
laakiin waxannu
jecelnahay
dhegaysiga!



Ma
akhrinnaa
buug?

Haa,
laakiin adigu
ma taqaanid
akhrinta!



Xataa carruurta saqiirka ah waa
loogu talagalay buugaagta!

AKHRI OO HADAL

Marka aad wada akhrisataan waxa ilmuhu ku wacnaan doonaa dhegaysiga iyo hadalka.


Luuqaddu waxay muhiim u tahay marka ilmuhu baran doono wax akhrinta.



Mikkel Rev
Satt og skreiv
På ei lita tavle
Tavla sprakk
Mikkel skvatt
Oppi pappas flosshatt



Demiya telefeeshanka.
U akhrista si degan oo
nabad ah.
Ku wada baashaala
kursiga fadhiga.



Ka sheekee
wakhtiyo hore.

Noo hees!



Tommeltott
Slikepott
Langemann
Gullebrann
Og vesle Petter spelemann

AKHRI OO SHEEKEE

Kor u akhri ama ka sheekee sawirada.
Carruurto waxay jeceshahay inay
dhegaysato codka aabaha ama hooyada.

DHOWR JEER AKHRI

Carruurto waxay jeceshahay inay
isla buugii akhrisato dhowr jeer.





AKHRI WAX KASTA

Waxa akhrin kartaan wax aan buug ahayn. Tusaale ahaan xayeysiin, tabeelaha jidadka, qoraallo ku qoran wargeys iyo kartoona caanaha.

Ilmuhu wuxu baranayaa ereyo iyo hadal cusub marka kor loogu akhriyo.

U sharax ereyada macnahoodu adagyahay.

VEGSKILT



Títíl,
tâtíl,
tíllarot,
neglefru
og store gubben hesten



Beri waxa jiray dacawo
yar, oo ku noolayd aqal
yar oo ku yaala duurka...



MEEL KASTA KU AKHRI

Dhulka. Miiska nadiifinta.
Baska. Tareenka. Xeebta.

Kursiga fadhiga. Beerta guriga.
Beerta dadweynaha. Duurka.

ADIGUNA AKHRISO

Marka adigu wax akhridid, ayuu
ilmahaaguna wax akhrin doonaa.



BOOQO MAKTABADDA

Maktabadda waxaad ka helaysaa talooyin ku saabsan buugag wacan, buugaag cod ah, filimo iyo cayaaraha kumbuyutar.

Carruurta way iman karta oo ma u baahna inay aamusaan ama soc-socon.

Maktabado badan ayaa sameeyaa Waxyaabo carruurta yaryar ku mashquuli karto.




Ein-to-tre-fire-fem-seks-sju
Reven er ein hønsetjuv!
Sju-seks-fem-fire-tre-to-ein
Reven stal eit hønsebein!



AKHRI BUUGAAG

Si bilaash ah kaga amaho maktabadda.
Haddii hadyado la idin siinayo codsada
buugaag. Ka soo gata dukaanka buugaagta.
Internetka. Dukaanka cuntada.



Eín gul knapp,
vírre vírre vapp,
du slapp!

BADI AKHRINTA

Ma u baahnid inaad akhriso wakhti
dheer, laakiin badso wakhtiyada
akhriska.



Bokstart waxa la raba in carruurta iyo dadka waaweyn ka helaan akhrin wadajir ah. Waxa la raba in laga helo akhrin wacan isla markaana lagu xoojiyo barashada luuqada inta ilmuhu yaryahay. Bokstart ayaa la raba inay keento in waalidku aragti fiican ka yeesho suugaanta, maktabadda u dhow iyo rugta caafimaadka dhallaanka.

Marka ilmaha iyo waalidkooda la siiyo buug hadyad ah, waxannu fududaynay sidii ay xidhiidh wacan oo dheer ula yeelan lahaayeen luuqada iyo suugaanta.

